

Calgary



Vehicle for Hire



QODOBKA #001

ISBEDELKA DEGDEGGA AH EE XUSUUSINTA - Hubinta Bilayska ee Liisanka
Darawalada Tagaasida **Abriil 15, 2025**

Vehicle for Hire waxay jeclaan lahaayeen inay xasuusiyaan dhammaan darawalada tagsiyada isbeddel muhiim ah oo lagu sameeyay hannaanka helitaanka hubinta macluumaadka ee bilayska si loo cusboonaysiiyo liisanka darawalnimada tagaasida.

Laga bilaabo Janaayo 1, 2025, **dhammaan darawalada tagaasida waxaa looga baahan yahay inay si toos ah uga soo qaataan hubintooda bilayska adeegga bilayska ee magaalada ay deggan yihiin** oo ay keenaan natiijadooda hubinta bilayska xafiiska Vehicle for Hire si ay u cusboonaysiiyaan liisanka darawalada tagaasida.

Hubinta bilayska waa inay ku taariikhaysnaataa 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda codsiga.

Si aad u codsato hubinta Bilayska ee Calgary, fadlan raac linkigan:



[calgarypolicechecks](https://calgarypolicechecks.ca)

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan iimayl u dir vfhlicensing@calgary.ca.

Mahadsanid,

Cory Porter

Ku Xigeenka Guddoomiyaha, Vehicle for Hire
Jaangoynaha Gaadiidka Dadweynaha